

KHILAAFAADKA DHISMAHA GAARKA LOO LEEYAHAY: TUSMADA XALINTA KHILAAFAADKA



Mararka qaar talaabooyinka ay xubnaha bulshadu ku sameeyaan gurigooda ayaa saamayn kara guryaha dariska ah. Haddii arimo sida biyaha daadka ama bulaacada ay saameeyaan aysan gaari Kaabeyaasha Degmada (wadada ama nidaamka daadka), waa arimo madani ah oo u baahan in ay xalistaan dadka dhismaha leh. Gobalka California ayaa maamulaaya qaar kamid ah shaqooyinka dhismaha gaarka ah, laakiin Degmada San Diego ayaan masuul ka ahayn khilaafaadka noocaan ah. **Degmada ayaa abuurtay tusmadaan si ay u taageerto xalinta khilaafaadka u dhxeeyaa dadka guryaha leh ee quseeya daadka, nabaad guurka, iyo biyaha soo butaaca.**

KHILAAFAADKA GUUD EE LABADA DARIS U DHEXEEYAA

Isbadellada dhulka ee saamaynaaya beeraha, tayada aasaaska dhismaha, ama quruxda ayaa abuuri kara khilaafaad ka dhex dhaca dadka dariska ah marka ay biyo dheeri ah ama bulaacad kasoo gasho dhismaha u dhow. Isbadelaan waxaa ku jiri kara ku badelida geedaha dhismeyaasha shubka ah, ee daadka kahortaga, ama kordhinta aaga fadhiga. Halkaan ayaad ka helaysaa sababaha ugu badan ee abuura khilaafaadka dariska.



Daadka sabab la xiriirta isbadellada dhulka taaga ah.



Nabaad-guurka keenista bulaacada ama qashinka xoolaha marinnada dhismaha.



Biyaha daadka oo saa'iid ah oo ka dhashay shubka ama meelaha kale aad u adag oo lagu daray dhismeyaasha kore.


Waxaan kaaga mahad celinaynaa dedaaladaada xalinta khilaafaadka gaarka ah ee dhismeyaasha u dhxeeyaa adoo difaacaaya hadda marinadeea biyaha. Arimahaan madaniga ah ayaa noqon kara kuwo dhib badan, laakiin waxaan rajaynaynaa in kharyaadkaan kaa caawiyaan xalinta cilado kasta oo soo baxa si degdeg ah oo qiimo jaban.

XALALKA

Hoos waxaad ka helaysaa kharyaadka bilaashka ah ama qimaha jaban ee kaa caawin kara kahortaga waxyeelada dhismaha oo yareynaaya nabaad-guurka. Waxaa kamid ah:

Jawaannada ciida

Waaxaha dab damiska ee dhammaan Degmada San Diego ayaa leh ciid iyo jawaannada ciida oo bilaash ah oo la heli karo si looga hortago daadka. Raadi astaannada dab damiska ee aad ka helayo ciida iyo jawaannada ciida oo kuu dhaw barta:



www.alertsandiego.org/en-us/preparedness/flooding.html

Magdhawga

Barnaamijka Magdhawga ee Jeexyada Biyaha ee Degmada San Diego ayaa ka caawiya dadka deegaanka soo magista qarashka uga baxa fuustooinka roobka, badelida cawska gogasha ah, xakameeyaha waraabka ee casriga ah, meelaha la maro ee roobka ku haboon, iyo waxyaabo kale:



Haddii aadan xalin karin dhibaatada si iskaa ah, halkaan ka hel caawimaad:

Xarunta Qaran ee Xalinta Khilaafaadka (NCRC)

- Iska ilaali magdhawyada qaaliga ah adoo adeegsanaaya adeegyada xalinta khilaafaadka ee NCRC ama kharyaad xalinka khilaafaadka:
www.ncrconline.com.
- NCRC ayaa guulo ka gaartay xalinta khilaafaadka ayadoo aqoonsanaysa mabaadil'i'da wadaaga ah iyo abuurista xalalka si loo xaliyo caqabadaha bii'ada.

